

Macluumaadkaaga

Waa mid gaar ah

Maxaa ku dhacaya macluumaadka markaad ka tahay macaamiil adeegan?

Yaanu nahay?

Waxaanu nahay mid ka mid ah adeegyada daryeelya bulshada iyo caafimaadka ee xaafadaada, oo dhammaan wadashaqeynaya si ay u fuliyaan baahidaada caafimaad.

Macluumaadkee ayaanu kaa qaadnay?

Waxaanu haynaynaa magacaaga iyo faahfaahinta meesha lagaala soo xiriiyayo diwaanka macaamiisha. Faahfaahinaha kale sida qorshahaaga daryeelka iyo macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga waa diwaangareeyaa wakhti kasta oo aad booqasho ku timaado.

Maxaanu u qaadaneynaa macluumaadkaaga?

Macluumaadka aan qaadno wuxuu naga caawinayaa inaanu baahidaada la socono, si aanu kaaga taxadarno sida ugu wanaagsan ee suurto galka ah. Waxaan sidoo kale u isticmaalnaa macluumaadka inaanu si wanaagsan u maamulo oo u qorsheyno adeegan.

Yaa kale oo arka macluumaadkaaga?

Macluumaadkaaga waxaa arki kara oo keliya aqoonyahanada adeegan ka shaqeeya ee ku lugta leh daryeelkaaga. Haddii kale, waxaanu bixin karnaa macluumaadkaaga haddii aad ogoshahay ama haddii sharci ahaan loo baahan yahay, sida xaalad caafimaad oo deg deg ah.

Ma heli kartaa macluumaadkaaga?

Haa, xaq baad u leedahay inaad codsato macluumaadkaaga iyo inaad weydiisato in la saxo haddii ay lagama maarmaan tahay.

Wax su'aalo ah oo kale?

Fadlan la hadal mid ka mid ah shaqaalahayaga haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kale ama cabasho ku saabsan waxa ku dhaca macluumaadkaaga intaad tahay macmiilkayaga, ama haddii aad dooneyso inaad isticmaasho ama hesho diiwaankaaga.

Maxaa door ah oo aad ku leedahay waxa ku dhacaya macluumaadkaaga?

Door baad ku leedahay waxa ku dhacaya macluumaadkaaga. Waxaan isku haleynaa macluumaadka aad na siiso si uu nooga caawiyo bixinta daryeelka saxda ah. Haddii aad go'aansato inaad nala wadaagin qaar ka mid ah macluumaadkaaga ama aad xadido isticmaalka diwaankaaga macmiilka, xaq baad u leedahay, laakiin waxaa laga yaabaa inay waxyeelayso awoodayada ah inaan kuu qabano adeegyada ugu wanaagsan ee suurto galka ah. Lana hadal haddii aad dooneyso inaad bedesho ama joojiso ogolaanshahaaga.

Sidee baa loo ilaalinayaa macluumaadkaaga?

Waxaan ballan qaadnay inaanu ilaalino qarsoodinimada diwaankaaga. Gaar ahaanta macluumaadkaaga waxaa sidoo kale ilaalinayo sharciga. Waxaanu u haynaa macluumaadkaaga sida ugu adag si ahaan waxaana u kaydinaa si ammaan ah.